

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

## WAR-SAAFADEED

Soomaaliya, January 31, 2024, Maamulka Warbaahinta Islaamiga ah ee Al-furqaan wuxuu cambaareynaya fal xadgudub ah oo ay xalay DF ku weerartay mareegaha idaacadda oo kala ah [www.radioalfurqaan.com](http://www.radioalfurqaan.com) iyo [www.radioalfurqaan.net](http://www.radioalfurqaan.net), kuwaasoo ay dadku kala socon jireen wararka iyo barnaamijyada kala duwan ee idaacadda.

Waxaan saaka ka war helnay warsaxaaafadeed kasoo baxay waaxda sirdoonka u qaabilsan DF ee NISA kaasoo ay ku qiratay iney iyadu ka dambeysa tallaabada lagu beegsaday mareegaha Shabakadda Al-furqaan, mana jirin arrintan ka hor xiriir ay nala soo sameysay oo ay noogu sheegeyso haddii ay jiraan wax cad oo ay nagu qoontsatay, marka laga yimaado in ay qoraalkeeda ku sheegtay inaan ka shaqeyno marin habaabin iwm.

Al-furqaan waa warbaahin Soomaaliyeed oo jirta muddo ku dhow 15 sano, kuna xiran yihiin dhageystayaal badan oo dalka iyo dibadda kala jooga, waxayna caan ku tahay oo loo soo doontaa xaqiiqooyinka ku aadan hagardaamooyinka ay ciidamada shisheeye iyo dowladahoodu ku hayaan dalkeena hooyo ee Soomaaliya maadaama ay yarihiin warbaahinada ka faallooda arrimahan.

Beegsiga mareegaha idaacadda wuxuu ka hor imaanaya mabaadi' ay mar walba dowladdu ku celceliso oo ah dhowritaanka xorriyadda saxaafadda, iyadoo aan ognahay ineysan jirin awaamiir lasoo saaray oo warbaahinta madaxa-bannaan loogu sheegayo ineysan ka hadal dhibaatooyinka ay shisheeyuhu ku hayaan dalka, weliba weerarkan wuxuu kusoo aadayaa xilli ay Al-furqaan bishan January xoogga saartay falanqeysta duullaanka ka dhanka ah badda Soomaaliya ee ay wado dowladda Itoobiya.

Dhowr jeer oo hore waxaa Al-furqaan lagu soo qaaday duqeymo hawada ah oo ay fuliyeen diyaaradaha Mareykanka si loo aamusiyo oo meesha looga saaro xaqiiqda dibindaabyada shisheeyaha ee aaan soo bandhigeyno, laakin xadgudubkaas daqiiqadna uma baaqan shaqada, sidoo kale weerarka ay DF kusoo qaaday mareegaha idaacadda waxba kama badalin adeegga aan u hayno bulshada, sidiisii ayuuna ku socdaa.

Haddaba, xadgudubyada noocan ah waxay na dareensiinayaan kaalinta warbaahineed ee aan ugu jirno bulshada weyna nasii dhiiragelinayaan. Ugu dambeyntiina waxaan dhageystayaasheena iyo kuwa cusub ee ay farriintan gaareyso u xaqijineynaa inaan sii wadi doonno adeegyada ay nooga barteen insha'allaah.